Hospice général

# Guudmarka LASLP

Sharciga Fayodhowrka Bulshada iyo La dagaalanka ka dhanka Faqriga (LASLP) wuxuu dhaqangali doonaa 1 Jaanayo 2025. Sharcigan wuxuu bixinaya taageerada diirada saaraya isdhegxalka shaqaalaha iyo bulshada ee dadka kuwaas si ku meel gaar ah ugu jira xaalad adag.

- Fayodhowrka bulshada waa xaq helitaankiisana waa la fududeyey, waxayna leedahay shuruudaha ugu yar ee maamulka.
- Taageerada bulshada waxaa bixiyo Hospice général oo ku saleysan qiimeynta fahamka taas oo suurtogal ka dhiigaysa in la dejiyo qorsho loogu talo galay in lagu buuxiyo baahiyahaaga gaarka ah (guriyeynta, caafimaadka, tababarka, shaqada, iwm.).
- Taageero gaar ah ayaa la siiya dhalinyarda, qoysaska iyo carruurta.

## Isdhexgal fudud

Xubnaha shaqaalaha Hospice général waxay ka taageerayaan soo noqoshada madaxbanana waxayna ku siinayaan:

- hawlo loogu talo galay joogteynta iyo xoojinta xiriirada bulshada;
- qiimeynta xirfadaha iyo hagida xirfada;
- koorsooyinka tababarada mudada dheer iyo mudada gaaban;
- shaqo barashada ganacsiga si ay sahasho inaad hesho xirfado cusub.

## Dhiiragelinta Shaqaalaysiinta

Waa muhiim si buuxdo ugu faa'iidaysato fursad walba oo shaqo ah oo soo baxda, madaama ay ku sahli doonto inaad joogteyso shaqaalaysiintaada iyo ballarintaada shabakadaada.

Marka aad shaqayso, xitaa shaqada galinka ah, qeyb ka mid ah mushaarkaaga laga ma jarayo kaalmada dhaqaale iyo dakhliga bilahaaga ayaa sidaa ku kordhaya.

300-farankis ah ee ugu horeya ee aad hesho ayaa ka dhiga, oo ayaa ku celin doontaa 15% haraadiga mushaarkaaga.

## Wadarta lacagaha waxaa lagu maareya miisaaniyadaada dheeriga ah

Wadarta lacagahan, taas oo aad ku maareyneyso baahiyahaaga iyo rabitaanadaada, waa lagu siinaya bil walba.

- **Asaaska wadarta guud** waxay daboosha baahiyaha hawlo-maalmeedka iyo kuwa qoyskaaga (cuntada, dharka, telefoonka, koroontada, hawlaha nasashada, safarka iwm.), iyo maamulka kharashadaadka, hawlaha la xiriirada bulshada iyo isdhexgalka shaqaalaha.
- **Wadarta guud ee lacagta ilmaha** waxaa loogu talo galay in lagu daboolo kharashaadka gaar ah ee la xiriira baahiyaha carruurtaada (taageerada waxbarashada, hawlaha nasashada, hawlaha ka baxsan manhadka, iwm.).

Kharashaadka kale, sida kirada iyo lacagaha daryeelka caafimaadka, waxaa bixiyo Hospice général iyadda oo lagu saleynayo kharashaadkaaga, oo lagu xirayo shuruudo gaar ah.

## Fududaynta Maamulka

Wadarta lacagta la bixin karo bishii guud ahaan waxaa la xisaabiya 6 bilbood walba. Haddii xaaladaadu isbeddeshay, waa inaad islamarkiba noo soo sheegta. Hospice général si joogto ah ma ku weydiineyso maamulka dhaqaalahaaga iyo dukumentiyada; tani waxay u fududeyneysa shakhsiyaadka ay khuseyso inay xooga saaraan bulshadooda iyo qorshaha isdhexgalka shaqaalaha.

*Wixii faafaahin dheeraad, booqo laslp.hospicegeneral.ch*